



War hooy ma laga yaaba in xadiiskaygu gaaro nin fadhigiisa ku dangiiga oo yiraahda : waxaa anaga iyo adinka inoo dhexeeya kitaabka Ilaahay

Almiqdaam inu macdi yakrib-Allaha ka raali noqdee wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate wuxuu yiri:- War hooy ma laga yaaba in xadiiskaygu gaaro nin fadhigiisa ku dangiiga oo yiraahda : waxaa anaga iyo adinka inoo dhexeeya kitaabka Ilaahay, waxaan ka helno ee xalaal ah waan xalaashanaynaa, waxaan ka helno ee xaaraan ahna waan iska xarimeyanaa, hadaba wixii uu xarimay Rasuulka Ilaahay naxariis iyo nabadi kor kiisa ha ahaate waa sida waxa Ilaahay xarimay.

[Xadiis Saxiix ah] [waxaa wariyey Abuu daawuud,tirmidi,ibn maajah]

Nabigu-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate wuxuu sheegay inuu soo dhawaaday waqti ay orondoonaan dadka qaarki iyagoo fadhiya, oo midkood isagoo ku dangiiga gogoshiisa, oo uu soo gaaro xadiiska Nabigu naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate, oo markaas uu dhaho: waxaan ku kala baxaynaa Qur'aanka kariimka ah isagaana nagu filan, waxaan ku aragno ee xalaal ah waan ku camal falaynaa, waxaan ku aragno ee xaaraan ahna waan ka fogaanaynaa. Nabigu-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate, ka dib wuxuu cadeeyey wax kastoo Nabigu xarimay ama ku reebay sunadiisa inuu la mid yahay xugunka Ilaahay ku xarimay kitaabkiisa, waayo Nabigu Ilaahay ayuu fariinta ka sidaa.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65005>

